

Tillaabooyinka heerka deegaan ah ayaa ugu waxtar badan

War-saxaafadeed | Taariikh: 12.11.2021

| Lmbr: 147/21

Waxa soo badannaya dadka isbataallada yaalla koroone dartiis, adeegyada caafimaadka ee waddankana cadaadis ayaa saaran. Sidaas awgeed ayay dawladdu soo rogoysaa tillaabooyin heer qaran ah si hoos loogu dhigo faafidda cudurka, laakiin degmooyinku ayagaa aqoonta ugu badan u leh xaaladda ka jirta deegaankooda oo tillaabooyin ku soo rogi kara meelaha looga baahan yahay.

Haddii aan ku guuldarraysanno in aan faafidda joojinno, waxaa dhici karta in uu muddo gaaban gudaheed culays badan fuulo adeegyada caafimaadka iyo daryeelka. Degmooyinka cudurku aadka ugu badan yahay waa in ay tillaabo qaadaan.

– Si joogto ah ayaan xaaladda ula soconnaa, waxaanannaga oo ka welwelsan aragnaa in ay sii kordhayso tirada dadka isbtallaada la dhigayo. Waxaan qabnaa in ay sida ugu waxtar badan tahay in degmooyinka uu cudurku ku badan yahay in ay deegaankooda ku soo rogaan tillaabooyin cudurka looga hortageyo.

Mas’uuliyad weyn ayay degmooyinku dusha u riteen, waxayna muujiyeen inay si degdeg ah oo waxtar leh u joojin karaan cudurka dillaacay, waana muhiim in degmooyinka uu cudurku degdegta ugu sii kordhayo in ay dadaalka sii wadaan, ayuu yiri raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Marka loo baahan yahay in tillaabooyin lagu soo rogo degmooyin badan oo isku aag degaan iyo aag shaqo ah, waxaa muhiim ah in ay degmooyinku wada shaqeeyaan. Wasaaradda caafimaadka iyo daryeelka ayaa ka fiirsan doonta in la soo rogo xeer-hoosaadyo heer gobol ah haddii ay degmooyinka isku gobolka ah

ku guuldarraystaan in ay isla shaqeeyaan. Waxaa sidoo kale dhici karta in ay dawladdu go'aammo ku soo rogto degmooyinka iyo gobollada haddii ay degmooyinka wakhti dheer ku qaadato in ay deegaankooda ku soo rogaan tillaabooyin wax ku ool ah. Dawladda iyo laamaha mas'uulka ka ahba si dhow ayay xaalada ula socdaan.

– Waxaan islamarkaana og nahay waxa loo baahan yahay si faafidda loo joojiyo. Waa muhiim in uu qof walba guriga joogo haddii uu jirrado, tijaabo iska qaado oo gooni u baxo haddii laga helo cudurka koroona. Tallaalista oo la badiyana waxay noqonaysaa caawin muhiim ah. Waxaan qof kasta oo tallaalka qaadan kara ku boorrinayaa in uu tallaalka qaato, ayay tiri wasiirka caafimaadka iyo daryeelka Ingvild Kjerkol.

Dadka aan tallaalnayn ee u dhowaada qof cudurka laga helay waxaa waajib ku ah inay tijaabo iska qaadaan

Si loo xaddido faafidda cudurka ee bulshada dhexdeeda ayay dawladdu go'aamisay in dadka aan tallaalnayn ee ka weyn 18 sano, lana deggan qof laga helay koroone, inay waajib ku tahay in uu tijaabo iska qaado. Waajibkani wuxuu dhaqangelayaa laga billaabo 16-ka nofeembar.

– Haddii aadan tallaalnayn oo qof aad la deggan tahay koroone laga helo, waa in aad iskaa 7 maalmood maalin walba tijaabo iska qaaddaa ama aad labadii maalinba mar iska qaaddaa tijaabada PCR. Waxaa waajib kugu ah in aad tijaabo iska qaaddo ilaa ay 7 maalin ka soo wareegayso markii ugu danbaysay ee aad u dhowaatay qofka cudurka laga helay. Tani ma aha talo keliya, ee waa waajib, ayay tiri Kjerkol.

Haddii uu tallaalan yahay qofka la deggan midka cudurka laga helay, waxaa lagu talinayaa in labo tijaabo la iska qaado isla muddadaas (tijaabo qofku iska qaadayo ama tijaabo PCR ah). Waxaa sidoo kale lagu talinayaa in dhammaan dadka ka yar 18 sano ee la deggan qof cudurka laga helay, inay raacaan rajiim tijaaba-qaad oo la mid ah midka dadka aan tallaalnayn.

Haddii aad la deggan tahay qof cudurka laga helay, waa in aad guriga joogtaa inta aad ka helayso jawaabta tijaabada koowaad oo sheegta in cudurka lagaa waayay.

Shaqaalaha caafimaadka ee aan tallaalnayn waa in tijaabo laga qaadaa oo ay af-dabool xirtaan

Waxaa muddooyinkan danbe aad loo hadal hayay shaqaalaha caafimaadka ee aan tallaalnayn iyo khatarta loogu jiro in ay cudurka u gudbiyaan bukaanka kuwooda nugul. Agaasinka caafimaadka ayaa degmooyinka siiyay talooyin la xiriira sida ay uga hortagi karaan xaaladaha noocaan ah.

– Waxaan qaadaynaa tillaabooyin kale oo bukaanka nugul cudurka looga ilaalinayo.

Waxaan sidaas darteed doonaynaa shaqaalaha aan tallaalnayn in toddobaadkiiba laba jeer tijaabo laga qaado, si cadna loogu sheego in ay af-dabool xirtaan. Agaasinka caafimaadka ayaa degmooyinka u diraya tilmaamaha arrintaan loo raacayo, ayay tiri Kjerkol.

Dawladdu waxay sidoo kale rabtaa in iskoollada si gaar ah tijaabooyin badan looga qaado, si loo ogaado, loogana hor tago faafidda cudurka ee meelaha uu ku badan yahay ee uu cadaadiska weyn saaran yahay adeegyada caafimaadka.

Machadka Caafimaadka Dadweynaha (FHI) ayaa dhawaan beddelay talooyinkii la xiriiray tijaaba-qaadka iskoollada ku yaalla degmooyinka uu cudurku ku badan yahay.

Waxaa la kordhinayaa isticmaalka shahaadada koroonaha

Wasiirka caafimaadka iyo daryeelku wuxuu soo rogayaa xeer-hoosaad degmooyinka u oggolaanaya in ay deegaannadooda ku soo rogaan isticmaalka shahaadada koroonaha.

– Degmooyin badan iyo ganacsatada ayaa waxay doonayaan in ay isticmaali karaan shahaadada koroonaha si ay uga baaqsadaan in bulshada la xiro, shuruudaha kala fogaanshaha iyo xaddidaadda tirada dadka. Waxaan si degdeg ah u soo rogaynaa xeer-hoosaad degmooyinka u oggolaanaya in ay isticmaali karaan shahaadada koroonaha si ay u debsiyaan xeerarka koroonaha ee deegaannadooda, ayay tiri Kjerkol.

Waxay dawladdu suuragelinaysaa in shahaadada koroonaha lagu isticmaalo gudaha waddanka ayada oo aan la soo rogin tillaabooyin kale, waxayna sidaas darteed dawladdu dib u eegis ku samayn doontaa in la kordhiyo isticmaalka shahaadada koroonaha ee waddanka gudahiisa.

– Waxaan ka fiirsanaynaa in shahaadada koroonuhu ahaan karto tillaabo hoos loogu dhigo faafidda cudurka, sida in tusaale ahaan lagu isticmaalo cawaysyada, goobaha ruwaayadaha lagu dhigo, qabanqaabooyinka isboortiga,

shaleemooyinka iyo tiyaatarrada. Maaddaama hadda dadka oo dhan tallaalka loo fidiyay, ayaa waxaa laga yaabaa in ay fududdahay in shahaadada koroonaha loo isticmaali karo sidii looga hortegi lahaa faafidda cudurka, ayuu yiri raysalwasaare Jonas Gahr Støre.

Xeerarka tijaaba-qaadka

Haddii qof lagu caddeeyo in uu qabo cudurka covid-19, dadka guriga la deggan ee aan tallaalnayn ee 18 sano ka weyn waxaa waajib ku ah in ay tijaabo iska qaadaan (wuxuu dhaqangelayaa laga billaabo 17-ka nofeembar). Habka tijaabadu wuxuu noqonayaa in qofku iskii tijaabo iska qaado 7 maalin oo isku xiga ama in uu muddo 7 maalin ah labadii maalinba mar iska qaado tijaabo PCR ah. **(Qodob cusub)**

Dadka soo socda waxaa lagula talinayaa in ay tijaabo iska qaadaan:

- Dhammaan dadka isku arka calaamadaha cudurrada marinnada hawada oo cusub ama calaamado kale oo kuwa covid-19 -ka ah, ayada oo aan loo eegayn xaaladda tallaalka ee qofka.
- Dadka 18 sano ka yar ee aan tallaalnayn ee qof guriga la deggan laga helay cudurka covid-19. Waxaa dadkaas lagula talinayaa in ay raacaan labada rajiim ee tijaaba-qaadka ee dadka 18 sano ka weyn oo guri isla deggan isla markaana aanan tallaalnayn. **(Qodob cusub)**
- Dadka tallaalan ee la deggan qof cudurka laga helay waxaa lagula talinayaa in ay laba jeer tijaabo iska qaadaan hal toddobaad gudihiis. Dadka guriga la deggan una dhowaaday qofka cudurka laga helay waxaa lagula talinayaa in ay guriga joogaan ilaa ay ka imaanayso jawaabta tijaabada koowaad oo sheegta in cudurka laga waayay. **(Qodob cusub)**
- Waxaa intaas dheer in Agaasinka Caafimaadku laga billaabo 25-ka nofeembar uu soo rogi doono tilmaamo cilmiyeed oo ku saabsan in shaqaalaha caafimaadka ee aan tallaalnayn tooskana ula xiriira bukaanka in looga baahan yahay in ay joogto tijaabo isaga qaadaan, oo af-dabool xirtaan xaalado la qeexay. **(Qodob cusub)**

Talooyinka iyo xeerarka heer qaran ee wakhtigan xaadirka ah

- Shuruud ah in gooni loo baxo haddii qofka laga helo covid-19 (qofkii qodobkaan jebiya waa la ganaaxi karaa).
- In gacmaha marar badan la dhaqo.
- Istiraasho warqad ah ama laabka suxulka isticmaal marka aad qufacayso ama hindhisayso. Istiraashada tuur dabadeedna gacmaha dhaqo.
- Guriga joog oo tijaabo iska qaad haddii aad isku aragto calaamadaha cudurrada marinnada hawada oo cusub.

[Talooyinka dadka u dhowaada dad cudurka laga helay iyo kuwa ku jira gooni isu soocidda \(Machadka Caafimaadka Dadweynaha\)](#)